Government of **Western Australia**
Department of **Local Government and Communities**
Office of **Multicultural Interests**

Ku soo dhowoow Galbeedka Australia!

Galbeedka Australia waa mid ka ah Gobolada dadkiisu uu ugu kala duwan yahay Australia oo ugu dhowaan boqolkiiba 31 ama saddex meeloodkiiba meel tirada dadkeenu ay ku dhasheen dibeda. In ka badan kala bar boqolkiiba 52 waxay ugu yaraan leeyihiin hal waalid oo dibeda ku dhashay iyo weliba afar meeloodkiiba saddex meelood oo ah boqolkiiba 75 waxay isu arkaan inay ka soo jeedaan ehelo aan Australian ahayn. Oo ay ku jirto Ingiriiska, boqolkiiba 15 dadweynuhu waxay kaga hadlaan guriga luuqaad aan Ingiriis ahayn.

Galbeedka Australia waxay hoy u tahay dad ka yimid in ka badan 200 oo dal, oo ku hadla qiyaastii 270 luuqadood iyo lahjado (oo ay ka mid tahay 50 luuqadaha Aboriginal ah iyo Torres Strait Islander ah) . dadka Galbeedka Australia waxay raacaan in ka badan 130 diimood.

Dadka ka yimid boqortooyada Ingiriiska, Yurub, Aasiyada Koonfur bari iyo Bariga dhexe iyo qaar badan oo dhowaan ka yimid Galbeedka Aasiya iyo Afrika, wuxuu ka dhigteen Galbeedka Australiya gurigoodii, iyagoo abuuraya jewi wada noolaansho oo xushmeynaya kala duwanaanshaha.

Website kani wuxuu ku siinayaa macluumaad aad u balaaran iyo ilo macluumaad oo kaa caawinaya inay ka qayb qaadato dhammaan wejiyada bulshada, dhaqaalaha iyo nolosha dhaqan ee gobolkeena weyn. Wuxuu sidoo kale ku siinayaa ku faraxsanaanta ilaa heerka kala duwanaanta gobolkeena iyo faa'iidooyinka ay bixiso.

Xafiiska Danaha Dhaqamada badan

Xafiiska Danaha Dhaqamada bdan (OMI) waa qayb ka mid ah Bulshooyinka iyo Wasaaradda Dawlada Hoose. OMI waxay taageertaa horumarinta qorshayaasha Dawlad Goboleedka iyo barnaamijyada si kor loogu qaado dhaqamada badan oo loo hagaajiyo adeegyada dadka galbeedka Australiya ee ka soo jeeda dhaqanka iyo luuqadaha iyo diimaha kala duwan. OMI waxay siisaa hogaaminta dhaqamada fara badan ee qaybta dadweynaha, qaybta ganacsiga iyo bulshada WA – iyadoo abuureysa shirkow aad loogu wada jiro iyo weliba leh bulsho wax soo saar leh.

Qorshaheena istaraatiijiga ah ee 2014–18 wuxuu xooga saarayaa ujeedooyinka soo socda:

- Xoojinta waxqabadka jaaliyadaha dhaqan ahaanta kala duwan.
- Taageerida qorshayaasha dhaqan ahaan cidwalba ku daraya, barnaamijyada iyo adeegyada.
- Fududeynta ka qayb qaadashada bulshooyinka dhaqan iyo luuqad ahaanta kala duwan waxqabadka muwaadiniinta , dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshadaba
- Horumarinta fahamka isdhexgalka dhaqamada iyo kor u qaadida faa'iidooyinka kala duwanaanta dhaqanka ee Galbeedka Australiya.

OMI masuul kama aha muwaadaninamada (dhalasho qaadashada), visa ama arimaha socdaalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan socdaalka ama noqoshada muwaadin Australiyaan ah, fadlan kala xiriir Wasaaradda Socdaalka iyo Ilaalinta Xadka 13 18 81 ama gal www.immi.gov.au.

Barnaamijyadeena iyo qorshaheena

Adeegyada Luuqada

Qorshaha Adeegyada Luuqada ee Galbeedka Australiya 2014 is waa qorshaha Dawlada Galbeedka Australiya oo u qasdeysa inay hubiso inaysan luuqadu noqon wax dadka ka hor istaaga adeegyada iyo barnaamijyada dadka ugu baahan caawimaad Ingiriiskooda. Kuwo badan oo ah dadka Galbeedka Australia waxay u baahan yihiin in laga caawiyo sidii ay si wax ku ool ah ugu hadli lahaayeen tusaale, qaar ka mid ah dadka Aboriginal ka iyo Torres Strait Islander ka iyo soo galootiga iyo dadka dhegaha la' ama maqalka wax ka qaba.

Haddii aad booqato xafiiska dawlada oo aad caawimaad uga baahato ku hadalka Ingiriiska waxaad codsan kartaa turjumaan, oo bilaash ahaan aad ku helayso. Haddii aad heysato Kaarka Turjumaanka ee Galbeedka Australia, wuxuu kaa caawinayaa helitaanka turjumaan luuqadaada ah. Kuwan waxaa laga heli karaa adoo iimeyl u soo diraya: harmony@omi.wa.gov.au.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Qorshaha Adeegyada Luuqada WA waxaa laga heli karaa xagga hoose ee meesha Waxaan qabano ee website ka. Waxaa sidoo kale jira warqado macluumaad oo ku qoran luuqado kala duwan.

Barnaamijka Deeqaha Bulshada

Community Grants Program (CGP) wuxuu maalgeliyaa mashaariicda iyo nashaadka xoojiya waxqabadka jaaliyadaha dhaqamada kala duwan wuxuuna taageeraa horumarinta qorshayaasha dhaqan ahaan ta ay ku jirto, barnaamijyada iyo adeegyada. Deeqaha CGP waxay sidoo kale u qasdeysaa inay xoojiso isfahamka iyo isdhexgalka dhaqamada iyo inay kor u qaadaan faa'iidooyinka badan ee dhaqamada kala duwan ee WA.

Ururada bulshada ee diiwaangashan ee aan faa'iido doonka ahayn iyo kooxaha saldhigoodu yahay WA waxay dalban karaan maalgelin. Waxaa jira laba wareeg oo maalgelinood sannad kasta, mid waa Febaraayo mina Sebteembar. CGP waxay leedahay afar qaybood oo maalgelineed: mashruucyada yar yar ($5000 -$20,000), Barnaamijyada Waa weyn ($20,000 -$50,000), Dabaaldegyada Bulshada ($20,000) iyo munaasabadaha iyo nashaadka (ilaa $5000).

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir Sarkaalka Deeqaha OMI adoo iimeyl u diraya grants@omi.wa.gov.au.

Foomamka codsiga iyo awaamiirta waxaa laga heli karaa meesha Grants hoosteeda ee website kan.

Daabacadaaha iyo ilmaha macluumaadka

Daabacaadyo iyo ilo macluumaad oo fara badan ayaa laga helayaa website ka OMI ee qaybaha ilaha macluumaadka iyo macluumaadka kala duwan(Diversity information iyo Resources). Tan waxaa ka mid ah tirakoobka dhaqamada kala duwan ee WA, warqadaha macluumaadka diinta iyo dhaqanka iyo qalabka waxbarasho. Waxaa sidoo kale jira xiriirada ururada bulshada iyo dawlada.

Tusaha Adeegyada iyo Xiriirada Galbeedka Australiya

Waxay noqon kartaa wax adag inaad hesho adeegyada faraha badan ee aad ka heli karto dawlada ururada aan dawli ahayn iyo kooxaha ganacsiga ee WA. Directory of services and contacts in Western Australia wuxuu bixiyaa macluumaadka ugu muhiimsan iyo faahfaahinta xiriirka meelaha ugu muhiimsan ee guriyeynta, shaqada, waxbarashada, caafimaadka, gaadiidka adeegyada sharciga iyo xannaanada carruurta, iyo sidoo kale macluumaadka aasaasiga ah ee dawladaha gobolka, hoose iyo ta dhexe. Waxaad ka heli kartaa tusaha qaybta tusaha xiriirada ee website kan.

Buugga Adeegyada Dejinta

Settlement Services Catalogue wuxuu ku bixinayaa macluumaadka barnaamijyada iyo adeegyada dejinta ee ay ka heli karaan WA ee dadka asal ahaan luuqad iyo dhaqan ahaanba kala duwan (CaLD). Ujeedada keydka xogtu waa in la siiyo macluumaadka ururo badan , dhammaan hal meel ah. Waxaad ka heli kartaa adeegyada iyo barnaamijyada qaybahan soo socda hoostooda ee tusaha xiriirka ee website kan :

- ka qayb qaadashada bulsho
- waxbarashada
- shaqada
- taageerada bulshada iyo qoyska
- caafimaadka
- guriyeynta
- cadaalada
- adeegyada luuqada
- gaadiidka.

Waxaad sidoo kale ku raadin kartaa goobta. Adeegyada iyo barnaamijyada qaarkood waxaa lagu bixiyaa gobolka oo kale, saadaraadeed, fadlan ula xiriir hay'ada si toos ah wixii macluumaad dheeraad ah goobta kuugu fiican si aad u isticmaasho adeegyadeeda iyo barnaamijyadeeda. Waxaad ka heli kartaa tusaha qaybta Resources ee website kan.

Furasada loo siman yahay

Ahaanshaha bulsho ku jirta, Galbeedka Australiya uma adkeysato takoorida iyo Sharciga Fursada loo wada siman yahay ee 1984 wuxuu ka dhigayaa takoorida sharci darro. Waxaa tallo la weydiisan karaa guddoomiyaha Fursada Loowada Siman yahay ee Galbeedka Australiya (www.eoc.wa.gov.au). Fadlan ugu soo sheeg dhacdooyinka loo arko inay yihiin kuwo jinsid kicineyso Xarunta Caawimaada Police ka WA 131 444.

Natiijo celinta waa la soo dhoweynayaa

OMI waxay soo dhoweynaysaa wixii natiijo celin ah ee bulshada. Haddii aad heyso arin muhiim ah oo aad jeclaan lahayd inaad nagala hadasho ama aad qabto wax weydiimo ah oo la xiriira kala duwanaanta dhaqanka ee Galbeedka Australiya, fadlan noo soo dir iimeyl cinwaankayaga iimeylka wada noolaanshaha loo qoondeeyey ee ah: harmony@omi.wa.gov.au. Waxaan sidoo kale soo dhoweynaynaa qoraal u soo gudbinta kalandarka dhacdooyinka Events Calendar si aan kaaga caawino inaad xayeysiiso munaasabooyinkaaga aan faa'iido doonka ahayn. Fadlan ka eeg boggayaga interneetka Events Calendar wixii macluumaad ah ee ah sidii aad u soo gudbin lahayd munaasabad.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada iyo bilowyada OMI, faflan la xiriir:

Xafiiska Arimaha Dhaqama badan
Wasaaradda Jaaliyadaha iyo Dawlada Hoose
140 William Street
Perth 6000

Taleefanka: (08) 6551 8700
Fakis: (08) 6552 1555
Iimeyl: harmony@omi.wa.gov.au
Websaytka: www.omi.wa.gov.au